

Tilmaamaha Guud ee Imtixaanka Xirfadaha

Akhri tilmaamahan intaad sugayso gelista Imtixaankaaga Xirfadaha.
Kaadhkan waa in dib loogu soo celiyo Qiimeeyaha kaa qaadaya imtixaanka.

Marka lagaaga waco Qolka Imtixaanka, Qiimeeyaha wuxu:

- kaa dalban doonaa inuu arko aqoonsigaaga.
- ku kala tusi doona qolka iyo wax dhix yaalla si aad u aragto qalabka iyo agabka aad imtixaanka dartii ugu baahan tahay.

Imtixaanka Xirfadaha waxaad sameyn doontaa saddex xirfadood oo aad qaban karto si aad u daryeesho ama baxnaaniso macmiil. Marka xirfadahaas ku shaqeeynayo, Qiimeeye ayaa ku fiirsan doona oo qori doonaa waxqabadkaaga. Xirfadaha waxa lagu qaban doonaa tartame metelaya doorkii macmiilka ama qof caag macmala. Waa inaad ula dhaqanto oo ula hadasho jilaaga ama qofka macmalka ah sidii inuu/inay yahay/tahay macmiil dhab ah.

Ka hor inta aadan marin imtixaanka qiimeeyahaagu wuxu:

- ku siin doonaa kaadh ay ku qoran yihiin liiska xirfadaha ama hawlaha aad ku qabanayso imtixaankaaga iyadoo xirfad kasta ay la socdaan tilmaamaheedii.
- kuu akhrin doonaa tilmaamaha xirfad kasta. (turjumaan ayaa ku caawin doona haddii aad gelayo imtixaan aan Ingiriisi ku qornayn.)
- kuu sheegi doonaa markaad imtixaanka marayso iyo marka aad jili macmiil u jili doonto tartame kale oo imtixaanka maraya.

Imtixaanka xirfadaha, macmiilka:

- waxa loo tixgelin doonaa inuu maskax ahana soo jeedo oo amarada qaadanayo.
- waxa laga yaabaa inuu naafonimo jireed qabo inta xirfadaha qaarkood la wado.

Marka macmiilka uu metelayo qof (aanu caag macmala ahayn), qofka:

- waxa keliya loo ogol yahay inuu hadlo markuu ka jawaabayo su'aalahaaga.
- wuu dhaqaaqi karaa oo caawin karaa dhaqdhaqaqa.
- wuxu dhaqaaqi doonaa keliya marka laga dalbado inuu dhaqaaqo.

Marka aad metelayo doorka macmiilka:

- waxaad tahay macmiil maskax ahaan soo jeeda oo amarada qaadanaya kaas oo dhaqaaqi kara tilmaamahana raaci kara.
- waa inaad dhaqaaqdo KELIYA marka uu kaa dalbado tartamuhu inuu sidaas sameeyo.
- waa inaad hadasho KELIYA si aad uga jawaabto su'aal uu ku waydiiyay tartamuhu.
- waxa laga yaabaa in Qiimeeyuhu tilmaamo khaas ah oo ku saabsan doorkaaga macmiilnimo ku siiyo.
- waa in AADAN tartamaha kale sinnaba u caawin. Caawinta waxa ka mid ah inaad tilmaan siiso adigoo isticmaalaya kelmado, ishaarooyin, ama dareen wajiyeed. Dhaqanka noocan ah waxa loo tixgeliyaa qish oo labada tartame ee ku kaca imtixaanka waa laga saari doonaa mana heli doonaan wax natijjo imtixaan ah. Dhacdooyinka waxa loo gudbin doonaa Waaxda Caafimaadka ee Washington (Washington Department of Health).

Kuwani dhowr qodob oo ay tahay inaad maskaxda ku hayso markaad marayso

Imtixaanka Xirfadaha:

- Waa inaad si dhab ah u qabta xirfadaha ama hawlaha.
- Waa inaad xirfadaha ama hawlaha u qabataa qaabkay ugu soo kala horeeyaa Kaadhka Tilmaamaha ee Qiimeeyuhu ku siin doono. Waad akhrin kartaa Kaadhka Tilmaamaha guud ahaan intaad ku jirto imtixaankaaga.

Dhinac kale u rog kaadhka si aad u akhrido gadaasha waxa ku qroan →

- Tilmaamaha xirfad kasta si taxaddar leh u akhri. Imtixaankan, waxaad iska dhigi doontaa inaad dhammaan saddexda xirfadooda kala shaqaynayso hal macmiil, inkastoo qof macmiil jiilaya meteli doono macmiilkii hal xirfad iyadoo qof macmaleedkana macmiil ahaan loogu isticmaali karo xirfad kale. Xirfadaha qaarkood, tilmaamaha ayaa macmluumaad khaas ah ka bixin doona awooda ama xaddidaadaha macmiilkka. Tusaale ahaan, xirfadda dhar u xidhistaa jilaagu wuxu meteli doonaa macmiil gacantiisu awood daran tahay ama itaal ahaan liidato. Xaddidaadaas khaas ah waxay ku kooban tahay keliya xirfadda dhar u xidhistaa. Tilmaanta khaaska ah ee gacanta awoodda daran ma khusayso macmiilkka marka labada xirfadood ee kale la qimeynayo.
- Agabka iyo qalabka loo baahan yahay si xirfadaha ama halwaha loo qabto waxay yaallaan qolka imtixaanka. Haddii uu jiro wax aad heli kari wayday, waydii Qiimeeyaha.
- Markaad dhammeystirto xirfad, dhix "waan dhammeeeyay."
- Haddii aad u malayso inaad khalad sameysay intaad xirfadda ama hawsha wadday, waa inaad u sheegto Qiimeeyaha inaad ku laabanayso si aad u saxdo qaladkii. Waa xirfad sixitaan ku sameyn kartaa keliya xirfad ama hawl aad qabashadeeda markaas ku jirto. Markaad xirfad ama hawl gebagebayso, kuma laaban kartid xirfaddaaas.
- Marka Qiimeeyuhu ku dhiibbo Kaadhka Tilmaamaha, waxa laguu sheegi doono inta daqiqo ee aad haysato si aad imtixaanka u sameyso. Xaddiga waqtiga waxa lagu saleeyay xirfadaha. Qiimeeyuhu wuxu bilaabi doonaan tirinta waqtiga markaad bilowdo xirfadda ama hawsha koobaad, waxana laguu sheegi doonaa marka muddadii imtixaankaaga ay ka hadhsan tahay shan daqiqadood.
- Markaad dhammeystirto xirfadda ama hawsha ugu dambeysa, u qaado sidii inaad daryeekii maalintaas u dhammeystirtay macmiilkka.
- Inta imtixaanku socdo hadii Qiimeeyuhu la kulmo walaac badbaado oo khatar ah, imtixaanka waa la joojin doonaa, oo xirfadaas ama hawshaasina halkaas bay ku dhammaan doontaa.
- Waxa aad gelaysaa imtixaan heer gobol ah. Qiimeeyaha looma ogola inuu ku caawiyo ama wax ku baro ama kaala hadlo heerkaaga waxqabad ee imtixaanka.

Marka imtixaankaagu dhammaado, Qiimeeyuhu wuxu:

- Xogta waxqabadkaaga xirfadeed gelin doonaa kombiyuutar, kaas oo qiimeyn doona imtixaanka.
- Waxa lagu fari doonaa inaad fiiriso iimaylkaaga kana raadiso Warqadda Dhammeystirka, taas oo ay ku qornaan doonaan sidaad ku helayso warbixinta dhibcaha imtixaankaagii.

Shuruucda guud ee imtixaankan waxa ka mid ah:

- Aaladaha wax lagu duubo, taleefanada gacanta, bayjarada, Kaaliyayaasha Shakhsiyeed ee Dhijalka ah (Personal Digital Assistant, PDA) ama kamarada waa in la damiyo oo la xareeyo inta imtixaanku socdo.
- Wixii alaaboo khaas ah ee aad sidato waa in lagaaga xereeyo qolka imtixaanka laguumana ogola alaabadaada inta imtixaanku socdo.
- Kani waa imtixaan aan buugta laga ogolayn. Laguuma ogola inaad isticmaasho ama fiiriso wax qoraal ah, buug ama dukumeentiga macluumaadka imtixaanka inta imtixaanku socdo.
- Imtixaankan wax nasasho ah ma leh.
- Illaa adiga oo isu diiwaangeliyay inaad gasho Imtixaanka Xirfadaha aan Ingiriisida ku baxayn maahane, waxa lagaa rabaa inaad ku hadasho Ingiriisi KELIYA inta imtixaanku socdo, haddii aad imtixaanka waddo iyo haddii aad macmiil metelayso labadaba.

- Imtixaankaaga waa la joojin doonaa waana lagaa saari doonaa imtixaanka haddii aad edeb darro ama rabshad la timaado. Waxa sidoo kale imtixaanka laga saari doonaa haddii Qiimeeyuhu helo sabab uu ku aamino inaad qof kale iska dhigayso oo imtixaanka u gelayo ama haddii lagaaga shakiyo qish.
- Wuxaad fursad u heli doontaa inaad tilmaamaha su'aalo ka waydiiso Qiimeeyaha kadib marka uu ku tuso qolka imtixaanka iyo waxyaabaha yaalla.